

Isbitaalka cusub ee Angered oo diyaar noqon doona sannadka 2014

Waxaa la qorsheeyey in dhismaha cusub laga ag dhiso bartamaha magaalada *Angered Centrum*, waxaana la dhammaystirayaa 2014. Inta laga sugayo dhismaha cusub, waxaa la kordhinayaa qaabbilaadyo lagu qaban doono guryo ku yaal *Angered's Torg*. Waxayna u guuri doonaan dhismaha cusub kolka la dhammaystiro.

Taasi ma khuseyso daryeelka caafimaadka carruurta iyo dhallinyarada ee *Gamlestaden* oo halkaa weligii ku oollaan doona.

Waxaad noogu imaan doontaa iyadoo dhakhtar warqad kuu soo qoray

Isbitaalka *Angered's Närsjukhus* waxa weeye isbitaal ay joogaan dhakhtar takhasus gaar ah qaba. Waxaadna halkaa ku imanaysaa kolka warqad laga soo diro rugta daryeelka caafimaadka.

Waxaad kaloo imaan kartaa adigoo iskaa noo la soo xiriira. Waxaa jira foom aad ku buuxineyso warbixinahaaga shakhsiyadeed iyo astaamaha cudurka, kadibna waad noo soo gudbineysaa. Dhakhtarad halkaan jooga ayaa qiimeynaya foomka kadibna ku la soo xiriiraya.

Foomka aad adigu buuxineyso waxaad ka heleysaa bogga internet-ka www.angeredsnarsjukhus.se ama xafiiskayaga soodhoweynta. Waxaad kaloo noo soo diri kartaa taleefan si aan foomkaas kuugu soo dirno guriga!

Angered Hospital

Taleefan: 031-332 67 00

Warbixin dheeraad waxaa laga helayaa
www.angeredsnarsjukhus.se



Isbitaalka xaafadda Angered

– Specialistvård i Nordost
(Daryeel takhasus)

Vuxenspecialistcentrum – Rugta takhasuska dadwaynaha

Waxaa jooga khubaro ku takhasusay cudurada wadnaha xididdada dhiigga, cudurada sambabada iyo cudurka sonkorta ama macaanta. Waxaa kaloo halkaa ku yaal qaabbilaadda dhibaatooyinka la xiriira luuqadaha, hadalka iyo waxliqidda.

- 1 Adrees: Triörgatan 2, 424 65 Angered
Tal: 031-332 67 00
Saacadaha rugta ay furan tahay: 07.30–16.00

Qaabbilaadda raajada

Waxaa raajo la saaraa oo baaritaan lagu sameeyaa sambabada iyo lafaha iyo baaritaan lagu dhegeysto gudaha jirka.

- 1 Adrees: Triörgatan 2, 424 65 Angered
Tal: 031-332 67 63
Drop in (ballan la'aan): 08.00–15.00
(Waqti qado 12.00–12.45)

Smärtcentrum – Xarunta xanuunada

Khubarada daryeelka xanuunada wax ka qabadkoodu adag yahay. Kolka laga reebo xanuunada joogtada ah waxaa xanuunada la daaweynayo ka mid ah xanuunada kansarka ama kaankarada, xanuunada maskaxda la xiriira, xanuunada cadaadiska hawlaha badan iyo xanuunada shaqojooyinta maskaxda.

- 1 Adrees: Triörgatan 2, 424 65 Angered
Tal: 031-332 67 00
Saacadaha rugta ay furan tahay: 07.30–16.00

Psykiatrisk Öppenvård – Qaabbilaadda furan ee daryeelka cudurada maskaxda

Waxaa lagu daryeelaa xaaladaha ay ka mid yihiin niyadjabka, walaaca, astaamaha wax isku khasabka, cabsi-ka-qabka dhexgalka dadka, welwelka guud, xanuuno la xiriira maskaxda iyo jirka, iyo xaalado la xiriira cadaadis ka yimaada hawlo ama armo ku bata.

- 2 Adrees: Angereds Torg 5, 424 65 Angered
Tal: 031-65 70 00



Sharaxidda habka lagu tago

Angered Centrum

Tareenada magaalada

Khadadka 4, 8 ama 9 oo ku dhammaada Angered Centrum.

Baska ka yimaada Bergsjön

Buska 74 oo ku socda Angered Centrum.

Baabuur lagu soo maro waddooyinka E6 ama E45

Raac calaamadaha tilmaamaya Angered Centrum oo dhig baabuurka P1 ama P2. Saddex saac oo lacag la'aan ah ayaa halkaa la dhigan karaa.

Gamlestaden

Tareenada magaalada

Khadadka 4, 6, 7, 8, 9 iyo 11 oo looga degayo Gamlestadstorget.

Baabuur

Waxaa baabuurka ku wadeysaa waddada Gamlestadsvägen oo u sii wadeysaa Gamlestadfabriker. Kharashka dhigashada baabuurku waxa weeye 8–10 karoon saacaddii.

Barn- och ungdomsspecialistcentrum – Xarunta cudurada gaarka ah ee carruurta iyo dhallinyarada

Waxa weeye qaabbilaad khubaro oo uu weheliyo daaweynta carruurta iyo cilmiga cudurada maskaxda carruurta. Koox ahaan ayaa loo la shaqeyaa bukaanka. Waxaan kaloo qaabbiinaa carruurta looga shakiqabo cudurada maanka.

- 3 Adrees: Angereds Torg 14, 424 65 Angered
Tal: 031-332 67 00
Saacadaha rugta ay furan tahay: 08.00–16.00

Gynekologimottagning – Qaabbilaadda cudurada dumarka

Qaabbilaadda khubarada cudurada haweenka badankood. Waxaa kaloo halkaa laga heli karaa talasiin ka hortagga uurqaadka, raajada gudaha jirka iyo baaritaanka/wax-ka-qabadka isbeddelka unugyada jirka iyo xubnaha dibedda u soo dhaca.

- 3 Adrees: Angereds Torg 14, 424 65 Angered
Tal: 031-332 67 00
Saacadaha rugta ay furan tahay: 08.00–16.00

Barn- och ungdomsmedicin Gamlestaden – Xarunta daawada carruurta iyo dhallinyarada

Qaabbilaadda khubarada ee carruurta iyo dhallinyarada. Waxaa kaloo halkaa talasiin talefoon waalidka ku siinaya kalkaaliyaha daryeelka caafimaadka carruurta. Waxaa qaabbilaadda ka shaqeyaa koox loogu talagalay carruurta qaxootiga ah oo dhowaan yimid.

- Adrees: Gamlestadsvägen 2–4, B2, 415 02 Gbg
Tal: 031-345 08 80
Saacadaha rugta ay furan tahay: 08.00–16.00